# Xidiga Libdhe



Foto: Supermurmel / AdobeStock

Meeraha Merkur oo Soomaaliduna utaqaano Libdhe ahna Xidig caan ka ah geyiga Soomaalidu degto waa meeraha ugu xiga Qoraxda waana meeraha labaad ee ugu baaxada yar Habqorexeedka,isla markaana ah kakeliya ee faraqa heerkulkiisu yahay mid aad u ba'an.
Meeraha Mercury waa meeraha ugu xiga Qoraxda waana meeraha labaad ee ugu baaxada yar

Habqorexeedka,dhexroorka Merkur wuxuu 40% kayar yahay ka dhulka,sidoo kale wuxuu 40% kaweyn yahay kadayaxa.Oogada sare

ee Meerahani waxay aad ugu egtahay sida kadayaxa,Taagagiisa boodhku qariyeyna waxaa usabab ah Commetyada sida joogtada ah uhaleela oo xansharka kadhiga dabadeed,kana soo mudhbaxaan dhagxaan kiiloomitiro kor u kacsan dhererana boqolaal kiiloomitir,aad baanay uyartahay in lahelo meel korkiisa kamida oo bed qabta, ama kabadbaadey bam garaynta joogtada ah ee Commet-yada iyo Meteort-yada.

Baaxada merkur waxay leegtahay1/3 jeer oo dhulka ah,waana meeraha ugu jimidhka yar meerayaasha oo dhan marka laga yimaado Pluto oo waxyar kahoruun lumiyey tilmaamihii meeranimo kadib markii uu wada buuxin waayey shuruudihii meeranimo dhamaystiran uu ku kasban lahaa,hadii muuq ahaan lays garab dhigi lahaa kadhulkeena iyo Meeraha Mercury waxaa kuusoo bixi lahaa sawir sidan hoos kamuuqata oo kale ah.
Merkur waa meeraha keliya ee hadii xataa laysku daro dayaxyada iyo meerayaasha hab-qoraxeedkeena leh heerkulka ugu badan marka laga eegayo faraqa hadba udhexeeya dhinaca markaa cadceedu hayso iyo dhinaciisa habeenka ah ,taa macneheedu waxaa weeyi inmarba dhinaca kuwajahan cadceeda heerkulku gaadhsiisan yahay 427 degreeC,kaasoo ah heerkul kufilan in lagu dhalaaliyo naxaasta,halka isla waqtigaas dhiniciisa habeenka ah heerkuljiisu.